



ismaamulka san diego

# dareereyaasha gaariyaasha



## **Aan Kuligeen Qaadano Doorkeena!**

Inta badan dadka deegaanka ayaa walaac ka qaba nadiifinta marinnadeena biyaha. Xaqiiqdii, xog aruurino laga sameeyay Ismaamulka San Diego ayaa muujinaaya in **ka badan 50% dadka deegaanku ay aaminsan yihiin in wasaqda gasha balida, harooyinka, iyo xeebaha ay si toos ah u saamayso ayaga iyo qoysaskooda.**

### ***Diyaar ayaan u nahay Inaan ku Caawino.***

Dareereyaasha saliida iyo sunta kale ee gaariyaasha ee gasha wadada iyo marinnada daadka ayaa usii gudbi kara nidaamka biyaha daadka kadibna toos u geli kara marinka biyaha ayagoon la daawayn. Barnaamijka **Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ka taageeraaya dadka deegaanka dedaaladooda kahortaga wasaqda biyaha asagoo siinaaya **tilmaamahaan muhiimka ah ee ka hortaga in wasaqda dareeraha gaariyaasha ee gasha biyaha daadka**, halkaas oo ay yihiin isha ugu wayn ee wasaqda iyo dhibaataada caafimaadka dadwaynaha.



**Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka raabka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN** kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, wabiyada, io badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda, ayna ku jiraan dareereyaasha gaariyaasha, ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.

### ***Maxaad Samayn Kartaa Si aad U ilaaliso Nadaafada Biyaheena?***

- **Ka fiiri gaariyaasha** dilaacyada dareeraha oo dayactir ku samee isla markaba.
- **Geli baafafka dareeraha qabta** hoosta gaariyaasha si loo qabto dheecaanka.
- **Tirtir ama adeegso istaraashada dheecaanka dhuuqda** (sida xashka biisada) halkii aad ka adeegsan lahayd biyo si aad u nadiifiso aagaga shaqada iyo waxyaabaha daata.
- **Gee cuntada la adeegsaday, sunta kahortaga barafaynta**, iyo waxyaabaha kale ee guriga ee khatarta ah xarunta qashin aruurinta. Si aad u hesho xog dheeraad ah, wac 1-877-R-1-EARTH (1-877-713-2784).

***Waad ku mahadsan tahay inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.***

***Nasoo Wac si aad u Hesho Xog dheeraad ah.***

**1-888-846-0800**

watersheds@sdcounty.ca.gov

www.sandiegocounty.gov/stormwater